# Maalmaha Wabarashada Khadka Tooska ah

## E-learning Days

Prodeo Academy waxay isticmaali doontaa Maalmaha Wabarashada Khadka Tooska ah waqtiyada cimiladu xun tahay. Dugsiyada Minnesota oo dhan waxay ku dareen Wabarashada Khadka Tooska ah si loo hubiyo ardayda sii wataan waxbarashada xitaa marka aanay suurtagal ahayn inay yimaadaan xarumahayaga sababa amni darteed. Maalmahan waxay sidoo kale yareeyaan khatarta ah in lagu daro maalmo dhamaadka sanad dugsiyeedka.

**Waa maxay Maalinta Wabarashada Khadka Tooska ah?**
Maalinta Wabarashada Khadka Tooska ah waxay ka dhici doonta guriga ardaygaaga. Mid kasta oo ka mid ah akadeemiyadayada ayaa siin doona culummada xirmo cashar ah oo aan isku mid ahayn bilowga xilliga cimilada xun, oo ku meelayn doona cashar haddii ay dhacdo inaan u gudubno  maalin Wabarashada Khadka Tooska ah. Macalimiintayada iyo shaqaalaheenna waxay diyaar u ahaan doonaan taageero khadka ah iyo khadka telefoonka maalintii oo dhan si loo hubiyo in ilmahaagu ku guulaysan karo casharka maalinta.

**Ogeysiinta**
Qoysaska waxaa la ogeysiin doonaa ugu yaraan 2 saacadood ka hor bilowga saacadahayaga waxbarida. Ogeysiisyada waxaa lagu samayn doonaa warbaahinta cusub, warbaahinta bulshada, fariimaha qoraalka ah, iyo robocalls ee dhammaan qoysaska. Fadlan hubi in macluumaadka qoyskaaga lagala cusboonaysiiyay xafiiska dugsigaaga.

**Maalinta Wabarashada Khadka Tooska ah goormaa la yiraahdaa**
Prodeo Academy waxay isticmaali kartaa ilaa 5 maalmood inta lagu jiro dhacdooyinka cimilada xun. Qodobada soo socda ayaa lagu tixgalin doonaa go'aankaas:

- Dhacdooyinka cimilada xun ee maalmo badan
- Awoodeena inaan ogeysiiyo qoysaska kahor 5:30 subaxnimo
- Inta maalmood ee aan u baahanahay in aan joojino dugsiga

**Imaanshaha**
Dhammaan ardayda waxaa looga baahan yahay inay ka qaybqaataan xirmada casharka maalintooda inta lagu jiro saacadaha dugsiga caadiga ah: 7:35 subaxnimo - 2:20 galabnimo, imaanshahana waa la qaadan doonaa.